Somali

Ammaanka interneetka ee loogu talagalay Xannaaneeyayaasha iyo Waalidiinta

Online Safety

Start the Chat

Interneetku wuxuu ka yahay qayb muhiim ah ilmahaaga aduunkiisa — waxbarasho, bulshanimo iyo madadaalo ahaanba.

Xannaaneeyayaal iyo waalidiin ahaan, waxaad ka caawin kartaan ilmahiina inay sahamiyaan aduunkooda digitaalka ah waxna ka bar wixii ku saabsan sidii ay isaga ilaalin lahaayeen la kulanka waxyaalaha dhibka badan ee interneetka oo ay u maareyn lahaayeen haddii ay yimaadaan.

Carruurtaada hore ula hadal, oo badanaa, wixii ku saabsan waxay ku sameynayaan interneetka. Wixii tilmaamo ah iyo tallooyin ku saabsan sidii aad carruurtaada uga caawin lahayd inay ammaan ku ahaadaan isticmaalka interneetka, gal website ka eSafety ee **esafety.gov.au/parents**

Ugu xoog sheegashada interneetka

Ugu xoog sheegashada interneetka waxay u dhici kartaa qaabab badan sida dirida fariimo cay ah, muuqaalo dhaawac badan ama fiidyowyo, xamasho xun, ama ka saarida ama ku bahdilida kuwa kale interneetka. Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu ka welwelsan yahay in hadddii ay kula hadlaan, xoog u sheegashadu ay ka soo darayso, ama inaad ka saarto isticmaalkooda interneetka ama taleefankooda gacanta.

Callaamadaha qaarkood laga yaabo inay tilmaamayaan in ilmahaaga xoog loo sheegto waxaa ka mdi ah:

- ka xummaanta ka dib markuu interneetka isticmaalo ama taleefankooda gacanta ama sir ka dhigida waxay ka qabtaan interneetka iyo isticmaalka taleefanka gacanta.
- noqoshada mid ka go'an dadka kale, walbahaarsan ama xanaaqsan, u muuqanaya mid kelidii ah ama welwelsan
- doonista inuu dugsiga iska daayo ama shaqadooda dugsiga oo hoos u dhacda.

Si aad u ogaatid intaa wax ka badan oo ku saabsan sidii aad ugala hadli lahayd carruurtaada wax ku saabsan dabeecad xushmad badan oo interneetka ah laga soo bilaabo da' hore, waana inaad hubisaa inay kuugu iman karaan wax kasta oo ay ka shakiyaan, gal website ka eSafety ee **esafety.gov.au/parents/big-issues/cyberbullying**

Xiriirka aan la dooneyn

Ma ogtahay qofkuu ilmahaagu interneetka kula hadlayo? Dhammaan waxaan dooneynaynaa inaan ka ilaalino dadkeena dhalinta yar la xiriirka dadka aysan aqoon, khaas ahaan cid kasta oo waxyeelo u geysan karta ilmahaaga.

La soco goobaha iyo apps ilmahaagu uu isticmaalayo kuna dhiirigeli inay kula hadlaan haddii qof interneetka ku jiraa uu kuu sheegayo inaad sameyso wax aan sax ahayn. Ka caawi ilmahaaga inuu ka digtoonaado calaamadaha xiriirka intetneetka ee aan caadiga ahayn, sida in la weydiiyey:

- su'aalo badan oo ku saabsan macluumaadka shakhsiyeed isla markiiba ka dib xiriirkii koowaad
- axsaan, hadiyado loogu abaalgudayo iyo bedel ahaan ballan qaadyo
- xiriir inuu ula soo sameeyo siyaalo kale, sida fariimo soo dirid iyo interneetka ku wada hadlida
- yaa kumbiyuutarka la isticmaala iyo qolka uu yaalo
- macluumaad saaxiibtinimo dhow
- xiriirkooda inay ka dhigaan mid sir ah
- qof ahaan inay kulmaan

Si aad u ogaatid sidii aad isaga xiri lahayd xiriirka aadan dooneynin iyo hagitaan dhammeystiran oo aad ku maareysid xiriirada aan la dooneyin gal website ka eSafety ee **esafety.gov.au/parents/big-issues/unwanted-contact**

Dirida sawiro iyo dirida kuwo qaawan

Waa muhiim inaad la hadashid carruurtaada isla markay waynaadaan wax ku saabsan waxa ka dhalan kara ee suurtagalka ah ama la wadaagida saaxiibtinimo dhow ama sawiro qaawan ama fiidyowyo, oo sidoo kale loo yaqaan kuwo qaawan ama Noods.

Markaad direyso muuqaaladaas waxaa laga yaabaa inaysan noqon kuwo guud sidaad adiga iyo carruurtaadu u maleynaysaan, waa muhiim inaad ka warheyso khataraha la wadaagida muuqaalo saaxiibtinimo dhow. Xitaa saaxiibada aad ku kalsoon tahay, waxbaa khaldami kara.

La wadaagida aan la dooneynin ee muuqaalada shakhsiyeed waxaa laga yaabaa inay keenaan bahdil, xoog u sheegasho iyo waxyeelada sumcada qofkaa dhalinyarada ah. Marka muuqaal la wadaago, ilmuhu wuxuu lumiyaa kontoroolka muuqaalkaas, waxaana laga yaabaa in lagu daabaco meel kasta oo interneetka ah.

OGOW: Abuurida ama wadaagida muuqaalo carruureed oo galmo iyo dad dhalinyaro ah oo ka yar 18 sanno jir waa sharci darro waxaana laga yaabaa in lagu qaado faldembiyeedyo iiyo ciqaabyo.

Si aad wax badan uga baratid oo ku saabsan sidii aad ugala hadli lahayd ilmahaaga wax ku saabsan derida sawiro iyo dirida sawiro qaawan, wixii tilmaamo ah ee waxaad sameyn lahayd haddii ilmahaagu direy ama helay muuqaalo qaawan, gal website ka eSafety ee at **esafety.gov.au/parents/big-issues/sending-nudes-sexting**

Qalabka, tilmaamaha iyo tallada

Waxaad ka ciyaari kartaa door muhiim ah caawinta ilmahaaga inay amaan ku ahaadaan interneetka. Inaad furfurnaato, aad hawlgasho oo aad wax taageertid waa u muhiim caawintooda inay yeeshaan dabeecada wanaagsan oo interneetka ah iyo garaadka lambarada.

Baro aalada interneetka ee ilmahaagu isticmaalayo idinkoo wadajirana isku raaca xeerarka isticmaalka interneetka. Xeerarkani dib ayaa loo eegi karaa marka ilmuhu sii weynaadaba.

Gebi ahaan, waa inaad, ilaalisaa inuu furnaado, marinada wada hadalka, dhageyso iyaga hana xukumin

Gal eSafety.gov.au/languages wixii macluumaad dheeraad ah.

Ka caawi ilmahaagu inuu interneetka amaan ku ahaado.

Bilow sheekaysiga.